

## HESHIISKA U HEELANAANTA GUULAYSI

	<b>U heelanaan Waxbarasho</b>	<b>U heelanaan inta Guriga la joogo</b>	<b>Arday</b>
	<b>Saxeex</b>	<b>Saxeex</b>	<b>Saxeex</b>
<b>Waxbarid iyo Waxbarasho:</b> ardaydu waxay istaahilaan heerka ugu sareeya ee suurtoagal ah ee waxbarid iyo gargaar ka caawiya inay waxbartaan.	Ahmiyadda in la saaro Ingiriisi iyo Xisaab si loo hubiyo heer sareeya In la bixiyo manhaj qani ah oo jirabaad iyo firfircooni gelin leh Isticmaal qiimayn joogto ah si loola socdo horumarka ardayga In la hubiyo ka hortag xili hore ah oo loo sameeyo caruurta dhibaatooyinku haystaan	Inay xiiso u yeeshaan waxa ay caruurtoodu baranayaan Taageeraan falsafadda iskuulka ee ah in wax weyn laga filo dhammaan ardayda Inay ka qaybqaan, markii ay suurtoagal tahay hawlaha fasalka gudahiisa iyo booqashooyinka goorba ka baxsan	Inay iskuulka yimaadaan xili hore si ay wax u bartaan Dedaal aada sameeyaan cashar walba Shaqadooda guri dhammaystiraan maalin walba
<b>Imaatinka:</b> Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay waxbartaan, waalidkuna waxay leeyihiin masuuliyad sharci ah oo ah inay hubiyaan inay caruurta iskuulka u tagaan si joogto ah	La xidhiidh waalidka maalinta ugu horaysa ee maqnaansho aan laga warqabin La xidhiidh waalidka ilmaha iskuulka si joogto ah uga soo daaha	Sameeyaan dedaal kasta oo ay ku hubinayaan in caruurtoodu iskuulka timaado maalinwalba iyo xiligii la rabey Iskuulka ku soo ogaysiiyaan sida ugu dhakhsaha badan suurtoagal ah wixii maqnaansho ah iyo sababta keentay Markii ay suurtoagal tahay, inay iska ilaaliyaan inay ilmaha dalxiis u kaxeeyaan xiliga iskuulku furan yahay	Iskuulka yimaadaan maalinwalba iyo xiligii la rabey

## HESHIISKA U HEELANAANTA GUULAYSI

<p><b>Habdhaqanka iyo Dabeecadda:</b> Ardaydu waxay sida ugu wanaagsan wax ugu bartaan deegaan nadaam lah oo qof waliba og yahay waxa laga filayo.</p>	<p>In la lahaado xeerar habdhaqan oo qof walba u abuuraya deegaan badbaado ah oo daryeel leh In la hubiyo in dhammaan shaqaalaha, ardayda, iyo waaliddiintu ogyihiin habdhaqanka laga filayo Si joogto ah loo dhaqangeliyo xeerarka habdhaqanka, ganaaxyada iyo abaalmarinada In shaqaalaha iyo ardayda lagu dhiirigeliyo inay yeeshaan dabeecad ah inay waxbartaan iyo inay daryeel sameeyaan</p>	<p>Guriga marka la joogo ku amaan habdhaqanka iyo dabeecadda wanaagsan ee xiliga iskuulka Iskuulka kala shaqee helitaanka xal haddii ay jirto habdhaqan aan la aqbali karin</p>	<p>Ilaali sharciyada iskuulka iyo fasalka Dabeecad wanaagsan u lahaw waxbarashada iyo iskuulka</p>
<p><b>Waxbarasha Guriga:</b> In guriga wax lagu barto waxay door muhiim ah ku leedahay in ardaygu guulaysto.</p>	<p>Waalidka la socodsii waxyaalaha ku saabsan qorshaha waxbarashada guriga Sii waxyaalo ku haboon, kulana tali hawlo guriga ku salaysan iyo sida loo caawiyo Si degdeg ah u sax shaqooyinka guriga lagu soo qabtay oo bixi rayi-celin ardayga dhisaysa</p>	<p>Ku dhiirigeliyaan ilmaha waxbarashada guriga oo saxeex qoraal maalmeedka iskuulka maalin walba Ku dhiirigeliyaan caruurtooda inay maalin walba wax akhriyaan Ku dhiirigeliyaan ilmahooda inay maalin walba ku barbartaan inay ciyaaraan qalabkooda muusiko (haddii ay munaasib tahay)</p>	<p>Inay dhammaan hawlaha waxbarasho guri ee loo diray sameeyaan oo iskuulka ku soo celiyaan xiligii laga rabey Maalin walba wax akhriyaan Ku barbartaan inay ciyaaraan qalabkooda muusiko (haddii ay munaasib tahay)</p>

## HESHIISKA U HEELANAANTA GUULAYSI

<p><b>Wadaxidhiidh:</b> Wadaxidhiidh wanaagsan oo ka dhexeeya guriga iyo iskuulku wuxuu lama huraan u yahay in la hubiyo in ardaydu hesho gargaarka ay u baahan yihiin.</p>	<p>Mar walba ahaw mid furfuran oo soo dhoweyn leh, waaliddiintana fursad u sii inay ka qaybqaataan nolosha iskuulka Hubi in waaliddiintu haystaan warbixino ku saabsan horumarka, habdhaqanka ilmahooda iyo arimaha guud ee iskuulka Hubi in waaliddiinta lala socodsiiyo waxa caruurtoodu baranayso Waaliddiinta u qorshee inay idinkala hadlaan hadafyo loo sameeyo ilmahooda Hubi inay dhegaystaan welwelada waalidka iyo inay sameeyaan sida ugu wanaagsan ee ay ku caawin karaan</p>	<p>Waa inay iskuulka u sheegaan wax kasta oo laga yaabo inay saamayn ku yeelato waxbarashada iyo habdhaqanka ilmahooda Yimaadaan kulan-fiideedka waaliddiinta Si degdeg ah oo toos ah iskuulka ugala hadlaan wixii welwel ah</p>	<p>Waraqaha, qoraalada iyo warbixinaha ka qaataan iskuulka oo guriga u qaataan, siiyaana waaldikood Waalidka iyo macalimiinta kala hadlaan wixii ku saabsan welwel ka jira iskuulka</p>
<p><b>Diyaar ahaansho:</b> in diyaar loo ahaado in wax la barto waxay lamahuraan u tahay in wax la barto, waana xirfad qiimo badan oo nololeed</p>	<p>In la hubiyo in macalimiinteen u qorsheeyaan casharada ay dhigayaan Haystaan ilaha waxyaalaha ay heli karaan si ay u dhacdo waxbarasho qani ah</p>	<p>Hubiyaan in ilmahoodu maalin walba xidho dirayska saxda ah Hubiyaan in ilmahoodu ay iskuulka la yimaadaan qalabka iyo buugaagta loo baahan yahay</p>	<p>Gashatid maalin walba dirayska saxda ah Iskuulka la timaadid qalabka iyo buugaagta saxda ah</p>

Iyadoo qayb ka ah sharciyada badbaado-ilaalinta ee hadda jira, xubnaha shaqaalaha ee ka shaqeeya Ark Tindal Primary Academy waxay leeyihiin waajibaad sharci ah oo ah inay maamulka munaasibka ah u gudbiyaan wixii welwelo badbaado-ilaalin ah ee la xidhiidha caruur iyo dad waaweyn, haddii welwelkaa loo arko mid khatar ah, marmarka

## **HESHIISKA U HEELANAANTA GUULAYSI**

qaarkood waalidka iyo daryeelayaasha waxaa laga yaabaa inaan lala socodsiin in gudbin noocaas ah la sameeyey.